



MINNEAPOLIS
PUBLIC SCHOOLS
Urban Education. Global Citizens.

9/28/2015

Gacaliyeyaal Qoysaska Cityview

Dugsiyada Dadaweynaha Minneapolis (MPS) ayey dhab ka tahay inay siiyaan ardayda oo idil waxbarasho heer sare ah, si cunugaagu ugu guulaysto dugsiyada iyo noloshiisa. Si aan u xaqiijino guulaysiga cunugaaga, waxaan u dejinnay heer naqdi sarreeya ee ka fal celin kara waxyaabaha lagu baro fasalladeenna. Sannad dugsiyeedka soo socda waxaan eegaynaa qiimayn cabbirro kala duwan oo muujinaya siyaabaha dugsiyeennu u guulaysanayo. Tan ayaa xaqiijinaysa inaan gaarno himmiladeenna ah in ardayda oo idil ay ku guulaystaan dugsiyada iyo noloshooda.

Sannad dugsiyeedkan Cityview ayaa loo qoondeeyey dugsi si joogto ah u soo hagaagaya (continuous improvement school) sida uu qabo Qaynuunka Federaaliga ah ee Dugsiyada Hoose & Sare (Elementary and Secondary Education Act) (ESEA). Kani waa natijada dugsiyada oo ka mid ahaa boqolkiiba 25 dugsiyada Title 1 ee ugu hooseeyey Hawl-fulinta Cabbirrada kala duwan ee gobolka (state's Multiple Measurement Rating) (MMR), kaasoo cabbiraya hawl fulinta dugsiyada ee aqoon sare u lahaanshaha ardayda, kobaca tacliimeed, dhimista bugcadda guul gaadhka ardayda iyo heerka qalin jabinta dugsiyada sare.

Dugsiyada horumarkoodu joogtada yahay waa inay u adeegsadaan xogta hawl fulinta ardayga marka ay qiimaynayaan baahida (needs assessment). Qiimaynta baahidu waa hannaan hab-dhis aan ku kala dhig dhigayno xogta dugsiyada, si aan go'aanka ugu salayno sidii aan ku hagaajin lahayn dugsiyada. Waxaan u adeegsan doonna natijada qiimaynta baahida si loo abuuro qorshe dib u hagaajin dugsiyada loola jeedo in lagu caawiyo ardayda oo idil inay gaaraan inta karaankoodu le'eg yahay. Si aan u gaarno shaqadan muhiimka ah, waxaan wadajir u diyaarinayna koox dib u hagaajin ee ka samaysan shardi-hayeyaasha kala duwan, ayna ka mid yihiin waalidku. Waxaan kugu adkaynaynaa inaad ka mid noqoto xubnaha dib-u-hagaajinta dugsiyada; haddii aad xiisaynayso soo wac lambarka hoose.

Qoysaska iyo bulshada ayaa xuddun u ah qorshaheenna dib-u-hagaajinta dugsiyada. Waxaa lugugu martiqaaday inaad nagala soo qaybgasho kulankeenna sanadleha ah ee Xaalada Dugsiyada iyo Title I. Ula jeedka kulankani waa inaan ku siino waalidka/daryeelayaasha warbixin ku saabsan xaalada dugsiyada hada ku sugan yahay iyo qorshaha Hagaajinta Dugsiyada. Dugsiyada ayaa idinla wadaagi doonaa waxayaabaha ahmiyada uu siinayo, hadafka iyo sidii uu ku gaari lahaa horumarkaas iyo sidii waalidka uu uga qabqaadan lahaa sanadkoo idil. Kalankani waxaa lagu sharaxi doonaa ula jeedka Title I iyo sidii waalidku u heli lahaayeen warbixin khosaysa waxbarashada cunugooda. Haddii uusan kulanku dhiicin ama aadan helin warbixintan, nagala soo xiriir maalinta iyo wakhtiga la qabanayo shirka.

Ka qayb qaadashadaada iyo kaalmadaada ayaa muhiim u ah guulaysiga cunugaaga. Waxaan kugu dhiirrigalinaynaa inaad la xiriirto cunugaaga macallimiintiisa, saad u barato sida ugu wanaagsan ee cunugaagu fasalka wax ugu baran karo. waa kuwaan hoose dhawr waxyaabood eed samayn karto ee ka caawin kara cunugaaga waxbarashadiisa:

- Hubi in cunugaagu dugsiyada tago maalin walba waqtiga loogu talagalay.
- U same meel deggan oo cunugaagu ku qabto shaqo gurigiisa ama wax ku akhriyo.
- Kala hadal cunugaaga dugsiyada.

Waxaan idinka rajeynaynaa inaad sii waddaan ku shuqlanaanta iyo wada shaqaynta si sannad dugsiyeedkani u noqdo mid wanaagsan! Fadlan nagala soo xiriire 612-668-2270 haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah ee la xiriira dadaalka dib-u-hagaajinta dugsiyada ama sidaad uga qayb qaadan karto.

Si daacadnimo leh,

Renee Montague
Maamule/Principal